yaan lagu dayn ratina inay ku xirnaato qoortiisa kuul iyo qardhaas toona, waana in laga wada goyaa)

Abii Bashiir Al-ansaari-Allaha ka raali ahaade: Wuxuu la socday Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee safaradiisa qaarkood, wuxuuna yiri: Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: of ayuu diray, dadkii oo jooga halkii la dagay -:(yaan lagu dayn ratina inay ku xirnaato qoortiisa kuul iyo qardhaas toona, waana in laga wada goyaa).

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu jirey safaradiisii mid ka mid ah, dadkuna waxay ku sugnaayeen meeshii ay dageen iyo tendhooyinkooda, qof buuna u diray dadka -si uu fariin ugu sheego- taasoo ah: in laga wada jaro wax yaabaha qardhaasaha ah ee awrta qoorta loogu xiray, ha ahaado xadhig, ama waxkale sida koorta ama kabaha, waayo waxaasay u xiri jireen, cabsi ay ka qabeen isha darteed, waxaana la amaray inay ka jaraan xoolaha waxaa, waayo wax ay ka difaaci kartaan jirin, wax tarka iyo wax yeelladuba gacanta Ilaahay bay ku jiraan, kaligi cid la wadaagta ma jirto.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/6761